



Dhaqtar Devon Q. Horton, *Kormeeraha guud*

Mudane Dijon DaCosta, Sr., *Guddoonka Guddiga*  
 Marwo Deirdre P. Pierce, *Guddoomiye Ku xigeen*  
 Marwo Anna Hill  
 Marwo Whitney McGinniss  
 Marwo Allyson Gevertz  
 Marwo Vickie B. Turner  
 Dhaqtar Joyce Morley

## WIXII FASAXID DEGDEG AH

Luuliyo 26, 2024

### Xiriirka:

Donald Porter, *Ed.D.* 678-481-4110  
 Carla Parker 404-734-1717

## DCSD Waxay ku Dhawaaqeysaa Balaarinta Barnaamijka Cuntada Bilaashka ah oo 105 Dugsiyo

(STONE MOUNTAIN, GA) — Arday Badan oo Dugsiga Degmada Gobalka DeKalb (DCSD) ayaa u suurto galeyso inay ku raaxeystaan quracda iyo qado oo bilaash ah inta lagu jiro sannad dugsiyeedka 2024-25! Degmada way ku faraxsantahay inay ku dhawaaqdo in Bixinta U qalmida Bulshadeeda (CEP) ee barnaamijka nafaqada la balaariyay. Barnaamijka ayaa hadda waxaa laga bixiyaa 105 dugsiyo, arday walba oo dhigata mid ka mid ah dugsiyada CEP ayaa u qalma qurac iyo qado bilaash ah.

“Waxaan ku faraxsannahay inaan ku kordhinay tirada barnaamijyada Dugsiga Degmada Gobalka DeKalb CEP oo aheyd 75 illaa 105,” waxaa yiri Dhaqtar Connie Walker, Agaasimaha Fullinta ee Adeegyada Nafaqada Dugsiga DCSD. “Barnaamijyada taageera ardaydeena iyo bulshada ayaa muhiim u ah guusha waxbarashada. Adeegyada Nafaqada Dugsiga waxay sameynayaan wax walba oo awoodeena ah si aan u caawino ardayda inay u diyaar ahaadaan inay wax u bartaan sida suurto galka ah.”

CEP waxay u ogolaataa dugsiyada iyo degmooyinka ku yaalo aagagga saboolka inay ku siiyaan qurac iyo qado si bilaash ah dhammaan ardayda ka diiwaangashan iyagoon uruurin codsiyada guriga. Dugsiyada qaata CEP-da ayaa loogu lacag celiyaa iyadoo la isticmaalayo qaab ku saleysan boqoleyda ardayda qeyb ahaan ugu qalma cuntada bilaashka ah iyadoo lagu saleynayo ka qeybqaadashadooda qaababka kale ee gaarka ah-barnaamijyada la tijaabiyay, sida Barnaamijka Kaalmada Nafaqada Dheeraadka ah. (SNAP) iyo Caawinta Ku meelgaarka ah ee Qoysaska Baahan (TANF).

Haddii dugsiya ardaygaaga uusan ku jirin liiska CEP, ardayda waxaa laga yaabaa inay u qalmaan [cuntooyin bilaash ah ama la dhimay](#). Si loo codsado faa’idooyinka cuntada, booqo [www.schoolcafe.com](http://www.schoolcafe.com). Liiska cuntada cusub ee DCSD ee sannad dugsiyeedka 2024-25 waxaa laga eegi karaa <https://www.dekalbschoolsga.org/school-nutrition/menus/>.

XXX